ROCKETSHIP

Khamiis, Luuliyo 9, 2020

Qoysaska,

Asbuucii lasoo dhaafay, Gudoomiye Lee wuxuu kordhiyay Xaalada Degdega ah o laga dhigay ilaa Agoosto 29keeda Duqa Magaalada Mudane Cooper na wuxuu ku dhawaaqay in Nashville ay ku laabanayso Wajiga 2 ee qorshaha dib u furida magaalada. Go'aanadaan waxaa loo gaaray sabab la xariirta in bulshadeenu ay wajahayso koror saa'id ah oo ku yimid dadka uu ku dhacaayo COVID-19. Tani waa kala wareeg wayn oo badalaaya qorshaha munaasabadaha waana astaan cadaynaysa in laga taxadiro dhammaan qoysaska, ardayda, iyo shaqaalaha loo baahan yahay intaan ku jirto mudada ka hartay xagaaga.

Bishii lasoo dhaafay, magaaladu waxay shaacisay Naqshada Ku laabashada Dugsiga si Amaan ah oo ay si wadajir ah u abuureen waaxda caafimaadka ee maxaliga ah iyo saraakiisha waxbarashada. Naqshadaan ayaa sheegaysa in dhismayaasha dugsiyada inaan dib loo furin inta magaaladu ku jirto Wajiga 2. Hase yeeshee, qaybo kale oo kamid ah qorshayaasha dib u furida magaalada ayaa wax laga badalay waxaana sugaynaa inaan tilmaan cusub ka helno saraakiisha caafimaadka iyo kuwa waxbarashada. Intaan sugayno, waxaan ognahay sadexdaan waxyaabood waqti xaadirkaan:

1. Caafimaadka iyo badqabka qoysaskeena ayaa wali ah muhiimadeena koobaad bulshooyinka aan u adeegnana waxay waajahayeen tirada dadka qaadaaya COVID-19 oo kordhaysa si ka badan qaybaha kale ee magaalada.
2. Xog aruurinteenii ugu danaysay ee gaadiidka iyo tignooloojiyada, 70% qoysasku waxay sheegeen inay doonayaan Waxbarashada Oonleenka ah biloowga sanad dugsiyeedka.
3. Waxaa la joogaa waqtigii aan gaari lahayn go'aanka kama danbaysta ah ee ku aadan qaabka aan u bilaabayno sanad dugsiyeedka si shaqaalaheenu diirada u saaraan ka guul gaarista qorshaha si markaas qoysaskeenu waqti ay ku diyaar garoobaan u helaan.

Sababahaan awgood, **waxaan ku furi doonaa sanad dugsiyeedkeena Waxbarashada Oonleenka ah, kadib dib u qiimayn ayaan samayn doonaa Sibteembar 1deeda.** Fadlan ogoow inaan leenahay nidaamka waxbarashada oonleenka ah oo adag la idiin diyaarshay ayna ku jiraan waxbarashada bulshada / dareenka ee maalin kasta, casharo muuqaal lagu bixinaayo iyo waqtiyada xiisadaha oo kaladuwan oo noo sahlaaya inaan arday kasta siino fursado waxbarasho iyo nashaadaad buuxinaayay baahiyahooda shaqsiga ah.

Si aan u samayno Waxbarashada Oonleenka ah dhawrkeena asbuuc ee ugu horeeya, waxaa noo dagsan jadwal suuragalinaaya inaad hesho chromebook yadaada iyo dhammaan xogta muhiimka u ah biloowga guulaysta ee sanad dugsiyeedka.

**Asbuuca 6da Luuliyo:** Inta lagu jiro asbuucaan, waxaan aruurinaynaa dhammaan Chromebooks ka ay samayso Rocketship. Waxaan u baahanahay Chromebooks yadaan si aan isbadal u samayno si dhammaan app-yada cusub looga helo aaladaada Rocketeer. Haddii ardaygaaga la siiyay aalada Chromebook si uu Waxbarashada Oonleenka ah ugu dhigto gu'gii lasoo dhaafay, waxaad keeni kartaa aalada xarunta dugsiga maalin uu asbuucaan kamid ah (Luuliyo 6deeda-10keeda) inta u dhaxaysa 10 AM iyo 2 PM. Keenista aaladaha fiidkii laga bilaabo 4:30-6:30 PM ayaa sidoo kale ah dookh furan maalinta Arbacada, Khamiista iyo Jamcada (Luuliyo 8deeda-10keeda). Waa inaad qorshaysataa inaad gaariga dhigato laynka aalad keenista ee ardayda aadana kasoo bixin gaarigaaga. Xubin shaqaalaha kamid ah ayaa kuu imaani doona si u kaaga qaado aalada Chromebook. Fadlan xasuusnoow inaad xirato maaskaro intaad la kulmayso shaqaalaheena, ayadoo maaskaradu qasab hadda ka yihiin Degmada Davidson.

**Asbuuca Luuliyo 13keeda: Tababarada Oonleenka ah iyo Kormeerada Macalinka.** Hogaamiyaasha dugsiyada ayaa qabanaaya munaasabado lagu bixinaayo tababar oonleen ah.

- **Rocketship United Academy** ayaa qabanaaya tababar oonleen ah oo la sinaayo qoysaska ku cusub nidaamka Rocketship maalinta Arbacada, Luuliyo 15keeda laga bilaabo 4:30-6:30 PM halka loo qaban doono qoysaska dugsiga kusoo laabanaaya Maalinta Khamiista, Luuliyo 16keeda laga bilaabo 4:30-6:30 PM.
- **Dugsiga Hoose ee Rocketship Nashville Northeast** ayaa qabanaaya tababar oonleen ah oo la sinaayo qoysaska ku cusub nidaamka Rocketship maalinta Khamiista ah, Luuliyo 16keeda laga bilaabo 5-6 PM halka loo qaban doono qoysaska dugsiga kusoo laabanaaya Maalinta Jamcada, Luuliyo 17keeda laga bilaabo 5-6 PM.

**Luuliyo 18keeda:** Labada xarumood ee machadku waxay samayn doonaan Maalinta Qaybtinta Aaladaha laga bilaabo 8 AM - 5 PM. Maalinta Qaybinta aaladaha, waxaan qaybin doonaa Chromebooks iyo alaabo kale oo muhiim ah. Anagoo samayn doona kala fogaanshaha dadka, waxaan doonaynaa inaan munaasabadaan ka dhigno mid dabaal-dag. Waxaan doonaynaa inay tani noqoto dhacdo farxad leh oo ka farxinaysaysa dadkeena isticmaala aaladaha Rocketship-ka biloowga sanad dugsiyeedka.

**Asbuuca 20ka Luuliyo:** Macallimiinta ayaa samayn doona booqashooyin oonleen ah oo guryaha lagu tagaayo kana jawaabaaya su'aalo kasta ood ka qabto Rocketship.Waxbarashada Oonleenka ah iyo aaladaha. Waxaan qiimaynaa xariirada si ka wayn wax kasta oo kale. Inkastoo aanaan imaan doonin gurigaaga, waxaan 100% aaminsan nahay inaan xariiradeena ku adkayn karno dhanka kumbuyuutarka iyo taleefanka. Macallimiinta ayaa kulasoo xariiri doona si shaqsi ah si ay kuula dajiyaan jadwalka waqti ay booqasho oonleen ah ku fiirinayaan gurigaaga.

**Asbuuca 27da Luuliyo: Machadka Waxbarashada Oonleenka ah** ayaa lagu samayn doonaa oonleen ahaan waxaana ka qaybgalaaya dhammaan qoysaska iyo daryeelayaasha taageeri doonaa ardyadeena isticmaasha aalada Rocketship ka ayagoo nagu biirinaayay khibradaha ay ka bareen waxbarashada oonleenka ah xiligaan dayrta. Macalimiinta ayaa kulasoo xariiraaya si ay qabtaan waqti inta lagu jiro asbuucaan si aad ula kulanto macalimiinta iyo koox yar oo

qoysaska kale oo ardaydoodu dhigao isla heerka fasalka ardaygaaga si aad u dulmartaan jadwalkeena waxbarashada oonleenka ah iyo nidaamyada oonleenka ah ayna uga jawaabaan su'aalo kasta ood qabto. Waxaan ku dhiiri galinaynaa ardayda, waalidiintooda iyo daryeelayaal kasta oo kale inay ka qaybgalaan Machadka Waxbarashada Oonleenka ah si qof kasta u ogaado waxa uu filanaayo marka dugsigu dib u biloowdo.

**3da Agoosto: Bilaabida Waxbarashada Oonleenka ah!** Inta lagu jiro 2 asbuuc ee ugu horaysa waxaan doonaynaa inaan dhiiri galino, aqoonsano aana taageerno dhisida dabeecadaha ardayda ee Waxbarashada Oonleenka ah. Waan ognahay in inta badan ardaydeenu ay adeegsadaan tikniyooloojiyadda waqtiyo kaladuwan asbuucii. Waan ognahay inay hawshaan fulin karaan. Yoolkeenu waa inaan ka dhigno Waxbarashada Oonleenka ah mid lala fal gali karo si lamid ah sida gaymka kumbuyuutarka!

Inkastoo aan si buuxda ugu diyaarsanahay ku laabashada dugsiga anagoo adeegsanayna Waxbarashada Oonleenka ah, tani ma ahayn waxaan filaynay inay noqoto dookha noo furan waqtigaan gaarka ah. Waxaan u xiisnay inaan toos idiin la kullano dhammaantiin iyo in ardaydeenu yimaadaan xarumaha dugsiga. Waxaa noo jooga maamule gabadhiisu bilaabi doonto fasalka barbaarinta ee dugsiga Rocketship waxaana dhammaanteen u rajaynaynaa biloow sidaan ka duwan ayada iyo dhammaan ardayda. Ayadoo ay taasi jirto, haddana amaanka ayaa ah muhiimadeena ugu wayn.

Xataa haddii dugsiyadu awoodaan inay waxbarashada tooska ah bilaabaan xili danbe dayrtaan, waxaan filaynaa in dugsiyo badan xirnaan doonaan dhammaan sanadka. Waxaan ku kalsoonahay inaan ka diyaar garoow fiicanahay dugsiyada kale ee hoose ee caqabadaan ku jira. **Dadalakeena ku aadan inaan arday kasta ka caawino gaarista higsigiisa ayaa maraysa meeshii ugu xooganayd. Waxaan mid kasta idinka mid ah kala shaqayn doonaa xaqiijinta in cunugaagu guul ka gaaro Waxbarashada Oonleenka ah. Waan u wada dhanahay tan!**

Si jaceel iyo qadarin leh,

James Robinson
Agaasimaha Iskuulada